

Su'aalaha Soo Noqnoqda(FAQ) ee Kusaabsan Caawimada Sharciga ah

Haddii xogta aad raadineyso aysan ku jirin boggan, ama haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir Adeegyada dhimasho baarista adigoo iimayl ku soo diraya coronial.response@justice.govt.nz ama wacaya 0800 88 88 20.

Boggan, waxaad ka heli doontaa jawaabaha su'aalaha soo noqnoqda qaarkood (FAQs) ee ku saabsan badalida qareennada ay maalgeliso Wasaaradda Cadaaladda una badasho caawimada sharciga ah.

Waa maxay caawimada sharciga ah?

Caawimada sharciga ahi waa maalgelinta dawladda si ay ugu bixiso kaalmada sharciga iyo wakiilnimada, inta badan dadka aan awoodin inay qareen qabsadaan. Caawimada sharciga ahi waxa lagu bixiyaa sida uu dhigayo Xeerka Adeegyada Sharciga ah ee 2011. Qareenku wali waa uu kuu shaqaynayaa, laakiin dawladda ayaa bixinaysa kharashkooda.

Caawimada sharcigu waa ay ka madax bannaan tahay Wasaaradda Caddaaladda. Waxaad dooran kartaa qareen kasta oo caawiyaha sharciga ah inuu ku matalo, oona kaliya maahan qareenada horay u helay maalgelinta Wasaaradda.

Yaa u qalma inuu helo caawimada sharciga ah?

Dhammaan dhinacyada danaynaya baaritaanka marka laga reebo hay'adaha waxay u qalmaan inay codsadaan caawimada sharciga ah inta lagu jiro baaritaanka.

Hay'adaha danaynaya ma awoodaan inay helaan caawimo sharci?

Maya.

Marka loo eego Xeerka Adeegyada Sharciga ah ee 2011, caawimada sharciga ah waxaa uun heli kara dad gaar ah.

Caawimada sharciga ah ma bilaashbaa?

Caawimada sharciyeedka waa u bilaash qoysaska Shahiidka, dhibbanayaasha ku dhaawacmay rasaasta ama marqaatiyaasha jooga labada masaajid.

Dhinacyada kale ee danaynaya ayaa laga yaabaa inay u baahdaan inay dib u bixiyaan qayb ka mid ah caawimada sharciga ah. Tani waxay ku xirnaan doontaa duruufahaaga dhaqaale.

Waa maxay sababta wakiilnimada sharciga ee baaritaanka dhimashada ay hadda u maalgelisay caawimada sharciga ah?

Marka loo eego Xeerka Adeegyada Sharciga ah ee 2011, caawimada sharciga ah lama helin karin ilaa ay bilaabmaan dhageysiga dacwada baaritaanka.

Ma isticmaali karaa qareenkeyga hada ayna Wasaaraddu maalgeliso oo walina miyeey ahaaneysaa mid bilaash ah?

Haa

Miyaan u baahanahay inaan wax sameeyo haddii aan rabo inaan sii wato isticmaalka qareenkeyga ay Wasaaraddu maalgeliso?

Maya

Qareenkaaga ayaa kula soo xiriiri doona oo hubin doona haddii aad rabto inay ku sii wadaan wakiilnimada adiga oo isticmaalaya caawimada sharciga ah. Haddii aad ogolaato waxay la xiriiri doonaan Adeegyada Kaalmada Sharciga si ay tan u abaabulaan. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad siiso macluumaad dheeraad ah sida faahfaahinta meelaha lagaaga soo xiriiri karo.

Maxaa dhacaya haddii aan rabo inaan beddelo qareennada?

Waxaad u baahan doontaa inaad hesho oo aad la xiriirto qareenka aad rabto inuu ku matalo oo aadna kala hadasho wax ku saabsan codsashada caawimada sharciga ah ee kiiskan. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad hubiso in qareenku yahay qareen la ansixiyay.

Xagee ka heli karaa qaareenka caawimada sharciga ah la ansixiyay?

Waxaad ka heli kartaa qareenka la ansixiyay ee caawimada sharciga ah aaggaaga adigoo isticmaalaya qalabkan hoose:

[https://www2.justice.govt.nz/find-a-legal-aid-lawyer/\(Link-iga dibada\)](https://www2.justice.govt.nz/find-a-legal-aid-lawyer/(Link-iga dibada))

Liiska dhammaan qareennada Christchurch ee hadda la ansixiyay ayaa laga heli karaa [halkan\(link-iga dibada ah\)](#).

Ma isticmaali karaa qareen aan ahayn midka caawimada sharciga ah ee la ansixiyay?

Haa.

Si kastaba ha ahaatee, qareenkaas ayaa u baahan doona inuu maro nidaamka oggolaanshaha caawimada sharciga ah ka hor inta aysan codsan caawimada sharciga ah iyagoo magacaaga ku hadlaya. Haddii kale, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad adigu lacag siiso qareenka.

Haddii aad doorato inaad isticmaalin qareenka caawimada sharciga ah ee la ansixiyay, waxaad qareen ka heli kartaa agagaarkaaga adiga oo isticmaalaya shabakada Ururka Sharciyaga ee New Zealand, [https://www.lawsociety.org.nz/for-the-public/get-legal-help/\(Link-iga dibada\)](https://www.lawsociety.org.nz/for-the-public/get-legal-help/(Link-iga dibada)).

Sideen ku heli karaa caawimada sharciga ah?

Qareenkaaga ayaa kaa caawin kara codsashada caawimada sharciga ah.

Ma u baahanahay qareen?

Waxaa laga yaabaa inaad u baahnayn qareen baaritaankan, laakiin way ku caawin doontaa haddii aad mid leedahay. Qareenku wuxuu kaa caawin karaa in lagugu matalo baaritaanka oo uu kaa caawiyo marxalad kasta ee habka.

Sideen ku ogaan karaa in aan helay Caawimada Sharciga ah?

Waxaad warqad ka heli doontaa Adeegyada Caawimada Sharciga ah. Warqadan waxey ku siin doonta macluumaad dheeraad ah.